

**WAA MAXAY ISTUUDIYOWGA HAL-ABUURKA LEAD?**

Qaar kamida ardayda dhigata Degmo Dugsiyeedka Park Hill, dugsiga sare aad ayey uga duwantahay. Ardayda ka tirsan istuudiyowga hal-abuurka LEAD waxay helayaan maalin-buuxda khibrad oo ku saaabsan barnaamijka kana dhacaya banaanka dhismaha xafiiska dowliga, halkaasoo naftoodu si dabacsan ujoogayaan, deegaan barasho oo shakhsiyadeed, diirada saaraya xirfadaha xalinta-khilaafka, barashada ku salaynta mashruuca iyo khibradaha xirfadeed. Sannad dugsiyeedka xiga, waxaanu furi doonaa dhismaha u khaaska ah LEAD, taasoo loo qaabeeyey barnaamijkan gaarka ah.

Dhammaan ardayda LEAD waxay helayaan hagayaal ka caawin doona habsami usocodka waxbarashadooda. Markay timaado LEAD, ardaydu waxay ka qaataan door firfircoon waxbarashadooda, halka macalimiintu siinayaan dhammaan ardayda ubaahan taakulada xakamaynta tiknoolajiyada taasoo u saamaxaysa ardayda inay gaadhaan hadafyadooda shakhsiyadeed iyadoo macalimiintu bixinayaan.

**ARDAY NOOCEE AH AYAA KASOO QAYB GALAYA ISTUUDIYOWGA HAL-ABUURKA LEAD?**

Hab shakhsiyeedka dugsiga wuxuu u furanyahay dhammaan jinsiyadaha ardayda kala duwan iyo dhammaan noocyada xiisaynta iyo hadafyada. Sannad dugsiyeedka 2020-2021, arday kastaa wey u furnaan doontaa ka qayb-galka LEAD, taasoo u muujinaysa ardayda degmada siguud ahaan dadka bulshada. Barnaamij shakhsiyeedka wuxuu taageeri doonaa dhammaan ardayda. LEAD wuxuu bixiyaa siiyaana adeegyo dadka baranayaya luuqada Ingiriisiga iyo ardayda ku jirta 504ka iyo IEPga iyo inay bixiyaan koorsooyin badanoo horeeya, ayna ka mid tahay AP iyo amaahda labada ah.

**FASALO NOOCEE AH WEEYE LEAD?**

Ardaydayada LEAD waxay qaataan fasalo isku mida ee ay bixiyaan labadayada dugsi sare. Si kastaba ha ahaatee, habkayaga wax dhigis waxay ku salaysan tahay mashruuca, ku salaysan dhibaataada iyo barashada xirfadaha ku salaysan khibrada (PBL), iyadoo ay la socoto barashada shakhsiyadeed. Waxaanu ku taageernaa ardayda anagii u samaynayna kulamo shakhsiyadeed kaashanayna hagge ahna macalin iyo fuliye, kaasoo lagu lafo guro samaynta hadafyo iyo horumarinta xirfadaha.

**NOLOSHA ARDAYGA LEAD SIDEE AYEY U EGTAHAY?**

Marka ay ardayda qaadanayaan fasaladooda LEAD ee istuudiyowga hal-abuurka, waxay weli sii joogayaan Dugsiga Sare Park Hill Trojans ama Park Hill South Panthers, waxayna awoodaan inay ka qayb-galaan waxqabadyada kabaxsan jadwalka waxbarashada ee dugsiyada sare ee guryahooda, sida kooxaha muusigada, ciyaaraha iyo qoob-kaciyaarka. Sidoo kale LEAD waxay bixisaa tiro ka mida ardayda kooxaha iyo waxqabadyada, usaamaxaysa golyaasha iyo fursadaha taaoo tusaysa rabitaanka dugsiga.

LEAD waxay xoojinaysaa xidhiidhka bulshada - tan waxaa ka mid ah bulshada LEAD, Park Hill iyo bulshooyinka dugsiyada sare ee Park Hill South, iyo bulshooyinka degen gobolka iyo kuwa caalamkaba. Ardayda LEAD waxay si balaadhan ula shaqeeyaan ururada

macaash la'aanta ee gudaha iyo howl-galinta mashaariicada shaqo ee diirada saaraya arimaha caalamka.
LEAD MIYEY BIXISAA WAX GAADIID AH?
Haa, Degmo Dugsiyeedka ee Park Hill wuxuu siiyaa gaadiid dhammaan ardayda.
SIDEE AYAA LOOGA JAWAABI KARAA SU'AALAHAYGA?
Fadlan xor ayaad utahay inaad nala soo xidhoodho LEAD (816) 359-4130, fadlan qorshee inaad nagala soo qayb-gasho habeen ka mida habeenada macluumaadka. Waxaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan habeenadan boggayada interneetka <a href="http://lead.parkhill.k12.mo.us">lead.parkhill.k12.mo.us</a> .
SIDEE BUU ARDAYGU U CODSAN KARAA?
Waanu ku casuunaa dhammaan ardayda inay isqoraan barnaamijka LEAD marka lagu guda jiro habkooda isqorista caadiga ah. Booska ayaa xaddidan.
Degmo Dugsiyeedka Park Hill 7703 NW Wadada Barry Caasimada Kansas, MO 64153
Istuudiyowga Hal-abuurka
Hogaan. Awood-siin.Rabitaan. Riyo.
LEAD